


# CCS ELEVATE

## SOUTH GRADE BAND STANDARDIZATION

Bishii Noofeembar 2023, waxaa mahad leh iyada oo ay ugu wacan tahay taageerada baaxadda leh ee codbixiyaasha Columbus, Dugsiyada Magaalada Columbus waxa ay meel mariyeen \$100-milyan oo canshuur ah oo ay ku ballan qaadeen in ay kor ugu qaadaayan xarumahooda ayna yarey-nayaan raad-raad-raacooda. Hadafka waa in la taageero hiigsiga degmada ee ah bixinta waxbarasho tayo sare leh ee dhammaan ardayda. Siyaasadda Guddiga (Per Board Policy) 7105, Kormeeraha Guud wuxuu abuuray Guddi Hawleedka Xarumaha Bulshada horaantii Febraayo 2024 si ay u qiimeeyaan dib-u-habeynta xarumaha degmada. Kooxdan hawshani waxay ka kooban yihiin shakhsiyaad leh asal iyo waayo-aragnimo kala duwan.

South Feeder  
Pattern  
6th Grades  
Relocate  
to South



Guddi-hawleedku waxay u soo jeediyeen talooyinka ugu horreeya ee Guddida Waxbarashada Talaadadii 7-da Maajo. Talooyinku waxay diiradda saareen waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada ee dhismayaasha, kor-dhinta galaan-galka tacliimeed iyo wax-qabadyada manhajka ka baxsan, bixinta adeegyo loo siman yahay ee qoysaska iyo ardaydaba, iyo xur-maynta maal-galinta cashuur bixiyeyaashii hore. Hadafka ayaa ah in si wanaagsan loo fahmo aragtida bulshada ee talooyinka bilowga ah iyo kor u-qaadida wadashaqeynta iyada oo loo marayo wada hadal furan. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in la waafajiyo qorshaha guud ee xarumaha iyo hiigsiga degmada iyo kor u-qaadida fahanka Dugsiyada Magaalada Columbus.

Kooxda Hawl-wadeenada Xarumaha Bulshada ee Kormeeraha guud waxa ay ku talinayaan in Guddida Waxbarashadu ay mideeyaan ardayda fasalka lixaad habka heerarka kala soocidda ardayda ee ka imaanaysa Koonfurta ee aadaysa Dugsiga Sare South High School, abuurista goob fasallada 6-aad ilaa 12-aad ah oo leh dugsi dhexe iyo dugsi sare oo isku dhul-waxbarasho ah (isku campus ah).

**Dugsiga Sare ee South High School (1928)** wuxuu u adeegi karaa 1012 arday; si kastaba ha ahaatee, laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2023-2024, 855 arday oo kaliya ayaa iska diiwaan-geliysay, iyada oo heerka adeegsiga hadda uu yahay 85%.

Dib-u-habaynta habka heerarka kala soocidda xuduudda imaanshaha ee koonfurta iyo soo dhawaynta ardayda fasalka lixaad ee **Dugsiga Lincoln Park, Livingston, Siebert, Southwood, iyo Stewart Alternative** ee aadaysa Koonfurta fasallada 6-aad ilaa 12-aad waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada ee fasallada ardayda dugsiga dhexe (6-aad ilaa 8-aad). Waxay siisaa ardayda fasalka lixaad waayo-aragnimada dugsiga dhexe ee caadiga ah iyo wakhti waxbarasho oo dheeraad ah.

Ku soo dhawaynta ardayda fasalka lixaad Dugsiga Koonfurta ee fasalka 6-aad ilaa 12-aad waxay siin doontaa dhisme ka wayn kii hore fursado lagu xoojinayo wax bixinta, oo ay ku jiraan goobaha tiyaatarka iyo ciyaaraha fudud. Tani waxay siin doontaa ardayda dugsiga dhexe oo leh waxqabadyo dheeraad ah oo ka baxsan manhajka, oo ay ku jiraan muusikada, hadalka iyo doodaha, jilidda, iyo farshaxanka muuqaalka, iyo sidoo kale fursado badan oo ciyaaraha fudud ah.